

# Refugee agencies help and advice



28/03/08

Somali

## Taageerida **Section 4\*** Vouchers'ka dheeraadka ah

Dhowr qofood ee helo taageerida (kaalmada) **Section 4 UKBA (Home Office)\*** waxay iminka codsan karaan vouchers (warqada lacag-bixinta) oo dheeraad ah. Wuxuu buug-yarahaan kuu macnaynayaa qofka soo codsan karo iyo waxa ay soo codsan karaan.

### Qof walba ee qaato taageerida **Section 4\*** (Qaybta 4) waxay soo codsan karaan vouchers dheeraad ah sidii ay:

#### 1. Ugu socdaalaan meelo ka fog 3 maylis – Haddii:

- Socdaalka loo samaynaayo sidii loo helo daawayn am xannaano caafimadeed (soo raacsii caddaynta ballanka markii aad soo codsanayso); ama
- Aad soo diiwangelinayso dhalasho.

#### 2. Warqadaha Dhalashada – Sidii lagu bixiyo kharashka samaynta warqad dhalasho oo buuxa.

#### 3. Wacitaanka telefoonka iyo diridda warqadaha:

Sidii loo bixiyo kharashka wacitaanada telefoonka iyo farankaboolada warqadaha loo diraayo:

- takhaatiirta/ xannaanada caafimaadka
- qareen xirfad ku leh inuu bixiyo talo hijradeed
- maxkamad ama maxkamad gaar ah
- **One Stop Service \*** (Adeegga One Stop)
- **Citizen's Advice Bureau\*** (Xafiiska Talobixinta Muwaadanka)
- xukumada deegaanka
- sarkaalka hijrada (laanta socdaalka); ama
- **Home Office (UKBA)\***

### Taageerid dheeraad ah ee loogu talagalay dumarka & waalidka leh carruur ku tiirsan ee ka yar 16 jir:

4. **Voucher (£250) oo hal mar kaliya loo bixinaayo cunug walba** – Waxaad kani soo codsan kartaa ilaa 8 toddobaad ka hor taariikhda la filaayo inuu dhasho ama 6 toddobaad ka dib markii uu cunugga dhasho.

Registered charity numbers: Refugee Action: 283660 Migrant Helpline: 1088631  
Scottish Refugee Council: SCO08639 Refugee Council: 1014576 Welsh Refugee Council: 1044885

Other leaflets are available at <http://languages.refugeecouncil.org.uk>  
Document control: commissioning agency, review date



## 5. Vouchers toddobaadle oo dheerad ah ee loogu talagalay dumarka uurka leh iyo carruurta ka yar seddax sano:

- Voucher dheeraad ah oo gaarayo £3 toddobaadkii intii uu uurka ka jiro
- Voucher dheeraad ah oo gaarayo £5 toddobaadkii markii cunugga cusub dhasho ilaa uu ka gaaro hal sano jir
- Voucher dheeraad ah oo gaarayo £3 toddobaadkii lana siinaayo cunugga marka uu yahay hal sano jir ilaa uu ka gaaro seddax sano

## 6. Voucher toddobaadle oo dheeraad ah ee loogu talagalay soo iibinta dharka carruurta:

- Voucher dheeraad ah oo gaarayo £5 toddobaadkii cunuggiiba ilaa uu ka gaaro sanad-guurada 16aad

## 7. Baahi gaar ah ee ka duwan:

- Haddii ay jirto baahi ka duwan oo loo qabo socdaalka, telefoonka, farankaboolada ama baahida aasaasiga ah ee nololaha ee kor lagu soo xusin, dadku way soo codsan karaan laakin waa inay soo raacsiiyaan caddayn.

## Sida loo codsado:

Foomka codsiga waxaad ka heli kartaa bogga internet'ka [UKBA\\*](#). Qof walba iyo bixiyaha meesha aad degan tahay ayaa kugu caawin karo inaad codsi u soo samaysatid [UKBA\\*](#) sidii aad u hesho vouchers dheeraad ah. Haddii lagaa diido, ma soo samaysan kartid racfaan.

### 1. Xaaladaha xallinta arrimaha (aad codsatey magan-galyo ka hor Abriil 2007):

Fakis foomka codsiga ugu soo dir kooxda [Croydon Section 4\\*](#) – foomka codsiga waxaad ka helaya bogga internet'ka:

<http://www.bia.homeoffice.gov.uk/sitecontent/applicationforms/asylum/casesresolutionsection4provision>

### 2. Haddii aad qabtid **NAM caseowner** (aad codsatey magan-galyo ka hor Abriil 2007):

Fakis foomka codsiga ugu soo dir hoggaamiyaha kooxda magan-galyada gobolka

<http://www.bia.homeoffice.gov.uk/sitecontent/applicationforms/asylum/section4provision>

Caddayn waa in mar walba la soo raacsiiyaa, tusaale ahaan:

- Caddaynta baahida caafimaadka
- Ha ahaado [MATB1\\*](#), ama warqadda dhalashada (haddii uu cunugga weli ku diiwansaneen [UKBA\\*](#))

Haddii aad leedahay wax su'aalo ah ama dhibaato ku qabtid codsiga, fadlan la hadal bixiyaha meesha aad degan tahay ama kala xiriir hay'addaada deegaanka ee talo-bixinta :

\*Ereyadaan waa magacyo urur ama ereyo kale ee la turjubi karin ee ku qoran af Ingiriis. Fadlan ka codso shaqaalaha talo-bixinta inuu kuu sheego macnahooda.